



do **1** thing

Himilada Do 1 Thing waa inay ku dhaqaajiso ashkhaasta, qoysaska, ganacsiyada iyo bulshadu inay u diyaargarobaan halisaha oo dhan ooy noqdaan qaar masiibada u adkaysta.

YOOLKA: Biyo ku filan 3 maalmood u hay qoyska. Tani waxay noqon kartaa 3 galaan qofkiiba.

Biyo

Haddii biyaha aad ka hesho nidaamka magaalada ama gurigaagu leeyaha ceel, biyahaagu waxay ku xidhan yihiin quwad haysasho si aad nidaamka u socodsiiiso. Marka korontadu go'do waxaad la kulmi doontaa biyo la cabbo oon jirin. Waxaad sidoo kale u baahan kartaa biyo la cabbo oo gurmada ah haddii biyahaagu wasakhooheen. Ceelasha gaarka ah iyo nidaamka biyaha magaalada waxay u nuglaan karaan wasakhaw marka masiibada.

Dooro mid kamida waxyaalahan soo socda si aad u samayso bishan si aad si fiican ugu diyaargarawdo:

Libso oo kaydi biyaha caagadaha ah ee la iibiyo oo 72 saac kugu filan (ama kabadan – ilaa laba toddobaad).

Biyaha ku filan qof saddex maalmood waa 3 galaan (hal galaan qofkii maalintii). Sidoo kale ku dar hal galaan oo dheeraad ood ugu talogasho rabbaayadda dhexe. Galaankaasi waa inuu jiraa saddex maalmood, laakiin qorshee in kabadan ama kayar haddii rabbaayaddadu wayn tahay ama yar tahay.

1 maalin, 1 qof = 1 galaan (ama 128 wiqiyadood) = 7 - 20 dhalo wiqiyadeed = 4 litir
3 maalin, 1 qof = 3 galaan (ama 384 wiqiyadood) = 21 - 20 dhalo wiqiyadeed = 12 litir

Xaaladda gurmada, waa inaad cabtaa ugu yaraan laba rubuc galaan (hal badh galaan) oo biyo ah maalintii. Cab 3-4 badh galaan maalintii haddaad joogto meel kulul, uur leedahay, bukto, ama ilme tahay. Qaar kamida biyahaaga gurmada waxa loo isticmaali doonaa karsiimada ama maydhista.

Haddaad iibsato biyaha caagadaha kujira ee la iibiyo, waa in la beddelaa sannakiiba mar. Ku kaydi biyaha meel qabaw oo madaw si aad u ilaaliso inay cusayb dhadhamaan muddo dheer.



Haddii biyuhu sii dhammaanayaan, waaligaa biyaha yaryaraynin. Cab inta aad u baahan tahay in badana berry raadi.

Caagado ku shub biyo 72 saac kugu filan guriga.

Haddaad ka hesho biyaha ceel gaar ah, jeermiska ka dil biyahaaga qasabadda kahor intaanan caagadayn. Ku dar lix dhibcood oo jaafeel ah galaan kasta oo biyo ah, si fiican u rux, kadib daa 30 daqiiqo ha fadhiistaane. Haddaad ka hesho biyahaaga nidaamka biyaha magaalada, baahi looma qabo inaad jeermis dile ku darto biyaha qasabadda kahor caagadaynta.

Beddel biyahaaga lix bilood oo kasta haddaad caagadaysay biyahaaga. Markasta nadiifi caagadaha intaanad dib u dhaamin. Ku kaydi biyahaaga meel qabaw oo madaw.

Nadiifi caagadaha kahor dhaaminta:

- (1) Ku maydh weelka saabuunta weelka biyona kaga rog
- (2) Ku nadiifi Milan ah 1 mulqaacad dareeraha jaafeelka ah rubuc biyo ah ee dhammaan oogada gudaha ee weelka
- (3) Daa hawadu ha qallajisee ugu yaraan hal daqiiqo.

Isticmaal caagado bac ah oo fur adag leh. Joogagga caanuhu ma noqdaan biyo kaydiye fiican, si fiican uma xidhmaan, biyaha lagu shubaana marmarka qaar waxay muujiyaan dhadhan bacbac ah. Kaliya isticmaal caagadaha hore ay ugu jireen sharaabyo (Caagadaha bacda ah ee sharaabka ayaa aad u fiican). *Eeg bogga hore si aad u ogaato inta biyo ay tahay inaad u diyaariso qoyskaaga xilliga gurmada.*

Baro sida loo siiyo biyo la cabbi karo qoyskaaga wakhtiga masiibada.

Kulayliyaha Biyaha – HA isticmaalin haddii taangiga ama qasabadda ay ku dhex jireen biyo daad ah!

- (1) Dami gaasta ama danabka kulayliyaha biyaha (ka dami danabka fuyuuska ama sanduuqa jabinta, bakhtii gaasta adoo helaya kaantaroorka siinaya kulayliyaha biyaha kulul rogayana gacanta kaantaroorka si uu gudbo – kuma xidhiidhsana – khadka gaasta)
- (2) Bakhtii kantaroorka biyo qaadashada (waa inuu ku dhaw yahay kulayliyaha biyaha)
- (3) Fur bullaacadda sagxadda taangiga
- (4) Fur qasabad biyo kulul (biyuhu waxay ka shubmi taangiga, maya qasabadda)

Daadi dhawrka galaan ee hore hadday kujiraan hadaa daxal ah. Ha daarin gaasta ama danabka mar kale ilaa taangiga dib loo buuxiyo.

Qasabadaga

- (1) Xidh kantaroorka biyaha ee wayn ee biyuhu guriga kasoo galaan (inta badan u dhaw biyo qiyaasaha haddaad isticmaasho biyaha magaalada).
- (2) Daa hawo ha soo gasho beebabka adoo furaya qasabadda ugu sarraysa gurigaaga.
- (3) Ka dhaanso biyaha qasabadda ugu hoosaysa gurigaaga (waligaa biyo ha dhaansan qasabadaha dhexgalay biyaha daadka).

Barafka – haddaad leedahay barxad qaboojiye, ka fikir qaybta fadhista ee biyahaaga. Tani waa faa'iidada dheeraadka ah ee ay leedahay ku ilaalinta cuntada qaboojiyuhu inay jiri karto muddo dheer marka danabku go'.